



## WAXA LA SAMEEYO MARKA AAFO AMA DHIB DEGDEG AHI JIRO

Marka degdeg jiro, waa inaad xusuunaatid in madaxda magaalada, degmada iyo gobolku diyaariyeen qorsheyaal degdegga loogu talagalay. Laakiin adiga ayaa masuul ka ah amaankaaga gaarka ah, xiitaa marka u jiro degdeg ama aaf. Haddii aad hore qoyskaaga ugu sameysatay qorshe degdeg, u hubso inaad raacdid. Mida kale, waa inaad xusuusatid afartan wax ee muhiimka ah:

### Joogso. Dhageyso fariimaha ku saabsan wixii la sameyn lahaa.

- Dhageyso raadhyowga, telefishanka, ama habka digniinta degdegga ee degmada.
- Marka dhib degdeg ahi dhaco, waxa dhici karta in madaxda degmada aanay suurogal u noqon inay isla markiiba war bixiyaan. Sabir yeello oo sug amarada.

### Wax dhageyso intaanad wax fallin.

- Sii wad inaad wixii fariimo ah ka dhageysatid telefishanka, raadhyowga, ama habka digniinta degdegga. Diyaar ha kuu ahaado raadhyow baytari leh. Saraakiisha ayaa kuu sheegi doona wixii aad sameyn lahayd.
- Haddii lagu sheego inaad guriga ka baxdid, xusuuso inaad gashatid dhar badbaado leh iyo kabo adag. Isticmaal jidadka ay sheegaan madaxda degmadu – ha isticmaalin jid dhow sababta oo ah waxa dhici karta in jidadka qaarkood la xidhay ama halis yihiin.
- Haddii lagu sheego inaad joogtid, sii wad inaad dhageysatid wixii kale ee ah amar.

### Xusuuso qorshehaagii degdegga iyo alaabtaadii ku-talogalka degdegga.

- Ka dib marka aad amar ka heshid saraakiisha, raac talaabooyinka ku qoran qorshehaaga degdegga.
- Qaado alaabtaada ku-talogalka degdegga. Alaabta ku-talogalka degdegga waa inay ku jiraan: raadhyow iyo toosh/karbuuno ku shaqeeya baytari, alaabta gargaarka koobaad, biyo, cunto, iyo badlad dhar ah. Haddii loo baahdo, waa inaad ku dartid alaabta ilmaha yar, qalabka caafimaadka ama dawooyinka dhakhtarku soo qoray, muraayadaha indhaha ama alaabta loogu talagalay muraayadaha wiilka isha la saaro.
- Ka wardoon jaaraka/deriska, gaar ahaan dadka waayeelka ah ama naafo qaba. Haddii aad tahay waayeel ama naafoole ama qof laxaad la', raac qorsheyaaga degdegga ama raac fariimaha ay bixiyaan saraakiishu si aad gargaar u heshid marka degdeg jiro.

### Is Daji.

- Waxa muhiim ah inaad is dajisid marka dhib degdeg ahi jiro. In alaale intii aad xaaladda war ka heli kartid isku day inaad ka heshid adiga oo daawanaya telefishanka, dhageysanaya raadhyowga, ama isticmaalaya Internetka.

**Ready in 3 (Diyaar ku Noqo 3 talaabo)** waa barnaamij loogu talagalay degdeg-u-diyaarsanaanta Missouri dhexdeeda. Waxa barnaamijka soo qabanqaabiyay Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Waayeelka ee Missouri. **Ready in 3** waxa loogu talagalay in dadka iyo beelaha lagaga caawiyo diyaar u-noqoshada noocyo badan oo ah degdegga ama aafuoyinka sida duufaanada ilaa argagaxisada. Wixii war dheeraad ah, u booqo [health.mo.gov/emergencies/readyin3](https://health.mo.gov/emergencies/readyin3).

*Somali-During an Emergency (Rev. 1-04)*